

Haddii aad xubin ka tahay bulshada Soomaaliyeed oo aad garaneyso xubno kale oo aan haysan *internet*, fadlan ku wargeli oo u sheeg [Shirarka Waxqabadka](#) ee joogtada ah.

Shirarka

Waxqabadka

oo joogto ah ayaa waxaa qabanqaabiya saraakiisha gudaha ee CISP si ay wararka billaha ah ee CISP ay u tusaan kuwa jeclaan lahaa in ay booqdaan shabakadda internet-ka ee CISP oo ay arkaan waxa CISP ay ka qabaneyso degaankooda. CISP waxaa ay qof kasta ku dhiirrigelineysaa in uu ka-qaybgalo shirarkaa uuna

jawaab-celin

ka bixiyo. Foomamka Jawaab-celinta oo waraaq ku daabacan waxaa laga heli karaa mid kasta oo ka mid ah xafiisyada gudaha dalka ee CISP. Si aad u ogaato sida loo maareynayo jawaab-celintaada, macluumaadkeenna ka eeg

[dabagalka jawaab-celinta](#)

Si aad u ogaato waqtiga la qabanayo shirka soo socda, fadlan:

- - email noogu soo dir cisp@cisp-som.org
- - si toos ah ula hadal shaqaalaheenna gudaha

Shirarka Waxqabadka ka ee joogtada ah waxaa ay qayb ka yihiin [dadaalka xisaabtanka](#) ee CISP ay u xisaab-celineyso ka-faa'iideystayaasheeda.